



## FEDERAL WAY PUBLIC SCHOOLS

# Ogaysiisyada Sanadlaha AH IYO

## MACLUUMAADKA KALE EE MUHIIMKA AH SANAD DUGSIYEEDKA 2024-25



ARDAY KASTA:  
CODKA. RIYO.  
MUSTAQBAL  
**WANAAGSAN.**

### MACLUUMAADKA KU SAABSAN DEGMADAYADA

**Federal Way Public Schools** waxay leeyihiin shirkad ka go'naashaha in wax la baro dhamaan aqoonyahanada. Qayb muhiim ah taasoo lagula xidhiidhayo si guud oo waadix ah waalidiinta iyo masuuliyiinta aqoonyahanada.

Daabacaadan waxa kujira ogaysiisyada sanadlaha ah ee ay u baahanyihiin labaduba sharciga gobolka iyo fadaraalkuba.

Fadlan akhri ogaysiiskan sandlaha ah, oo haddii aad su'aalo ka qabtid qeybo gaara halka lagala xidhiidhayo ayaa lagu sheegay daabacaadan.

### ARINKA DHEXDIISA

Macluumaadka Ku Saabsan Degmadayada .....	1
Cinwaanka I: Qaybta A - Ogaysiiska Waalidka ee Shahaadooyinka Macalinka .....	2
Shaqaalaysiinta iyo Bayaanka Shaqaalaysiinta ....	2
Dambiiyayaasha Galmada ee Diwaangashan .....	2
Child Find .....	2
Kabka Caymiska Shilka iyo Xanuunka Ardeyga ....	3
Shuruudaha Diiwaan Gelinta.....	3
Talaal Jaban ama Bilaash ee Kixida .....	3
Hargaab talaal .....	3
HIV iyo Kulamada Macluumaadka Qoyska ee Caafimaadka Galmada .....	3
Fayraska Human Papilloma (HPV).....	4
Qoorgooye .....	5
Hoolka Badbaadada Waxbarashada .....	5
Dugsiyada Ammaanka Linka tiba .....	6
Isticmaalka Daawada Cayayaanka .....	7
ParentSquare .....	8
Microsoft Office 365 iyo Google G Suite ee Waxbarashada.....	9

## Cinwaanka Iskuduwaha IX

Jennifer Koskovich  
Nancy Pappas  
253-945-2000  
[titleix@fwps.org](mailto:titleix@fwps.org)

## Sarkaalka U hogaansanaanta Xuquuqaha Rayidka

Jennifer Koskovich  
Nancy Pappa  
253-945-2000  
[compliance@fwps.org](mailto:compliance@fwps.org)

## Qaybta 504 U hogaansanaanta Iskuduwaha

Toni Cheever  
253-945-2086  
[504@fwps.org](mailto:504@fwps.org)

## ADA U hogaansanaanta Iskuduwaha

Nancy Pappas  
253-945-2000  
[ADA@fwps.org](mailto:ADA@fwps.org)

# Ku Xidhnow Federal Way Public Schools

Waxaad naga heli  
kartaa onlaaynka  
[www.fwps.org](http://www.fwps.org)

Nagala soco Facebook  
iyo X [@FWPS210](https://twitter.com/FWPS210)

## CINWAANKA I: QAYBTA A - OGAYSIISKA WAALIDKA EE SHAHAADOOYINKA MACALINKA

Cinwaanka I, Qaybta A waa barnaamij fadaraalka ah kaasoo u adeega baahiyaha gaarka ah ee caruurta—ku jirta barbaarinta ilaa fasalka 12—kuwaasoo la halgamaya waxbarashada. Cinwaanka I Barnaamijyada iyo adeegyada siinaya tilmaamo la sameeyay iyo manhaj kaaso ka caawinaya ardaydan inay buuxiyaan heerkooda aqoomeed oo ka qaadanaya hawl shaqaynaysa oo dan u ah waxay baranayaan ee ay qaban karaan. Cinwaanka I Barnaamijyadu waxay u dhisaan sinnaanta fursadaha carruurta ay halgankoodu inta badan ugu jira dhinaca waxbarashada. Waalidku waxay xaq u leeyihiin inay iska hubiyaan aqoonta macalimiinta caruurtooda wax u dhigaysa.

Hadii aad gudbisno codsi, fadlan haku jiraan macluumaadkan soo socda

- Magaca ilmaha.
- Dugsiga ilmaha.
- Magaca macalinka.
- Magacaaga iyo cinwaanka iimaylka.

U dir codsigaaga:

### Federal Way Public Schools

Jennifer Hymer, Madaxa Shaqaalaha

[jhymer@fwps.org](mailto:jhymer@fwps.org)

33330 8th Ave. S.

Federal Way, WA 98003

## SHAQAALAYSIINTA IYO BAYAANKA SHAQAALAYSIINTA

Degmadu waxay siin doontaa fursad shaqo oo loo simanyahay iyo daaweynta dhammaan codsada iyo shaqaalaha xagga qoritaanka, shaqaalaynta, sii haynta, meelaynta, beddelka, dallacaadda, iyo tababarka. Sida fursad shaqaalanimo oo loo simanyahay iyo daaweyn ayaa la siin doonaa iyadoo aan cidna lagu faquuqayn jinsi, mabda'a, midabka, halka uu asal ahaan kasoo jeedo, da'da, jinsiga, wacyigalinta jinsiga oo ay kujiraan aqoonsiga jinsiga, xaalada guurka ama shaqsiyaadka u qalma ee naafada. Degmadu waxay siin kartaa doorasho muwaadinka Maraykanka ama bixiyaha qaranka ee xulafada haddii laba musharax u qalma. Su'aalaha khuseeya u hogaansanaanta nidaamyada waxa lagu hagaajin karaa Sargaalka Cinwaanka Dugsiga Degmada IX/RCW 28A.640 iyo/ama Qaybta 504 Iskuduwayaasha.

## DAMBIILAYAASHA GALMADA EE DIWAANGASHAN

Si aad u hesho liiska ugu dhammaystiran iyo kan hadda ee Dambiilayaasha Galmada ee Diwaangashan ee ku dhex nool bulshada fadlan la xidhiidh wakaaladda fulinta sharciga deegaankaaga.

## CHILD FIND

Child Find waa habka lagu qabanayo hawlo gaar ah oo ujeedadu tahay helida, qiimaynta iyo aqoonsiga kuwa da'doodu u dhaxayso 21 jir ee qaba naafo la tuhunsan yahay oo degan gudaha xuduudaha degmada. Federal Way School ee Degmadu wuxuu bixinayaa baadhis si ay u aqoonsato caruurta dib u dhacday ama naafada, da'doodu u dhaxayso 3 ilaa 5 sano jir, kuwaasoo u baahan barbaarinta caruurta ama adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Tabashooyinka waxa kujira: hadalka/luuqada, waxbarashada iyo fahamka, iskuduwida iyo dhaqdhaqaaqa, xirfadaha bulshada, xirfadaha caawinta iskii ah (quudinta, u labisida, musqul gaynta), maaraynta dabeecada, aragtida ama maqalka. Carruurta horey loogu aqoonsaday inay naafada yihiin waa in sidoo kale la baadho haddii aysan helin barbaarinta hore/adeegyo waxbarasho oo gaar ah.

Haddii aad hayso wax tabasho ah/su'aalo ku saabsan horumarka ilmahaaga, fadlan wac si aad u ballansato baadhis.

### Caruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 3:

253-874-5445: Xarunta Horumarinta dhalashada ilaa Sadex; ama

253-854-5660: Xarunta Daawaynta Caruurta



## Kabka Caymiska Shilka iyo Xanuunka Ardeyga

Hadii ardaygaagu uu diwaangashan yahay dugsiya ciyaaraha, isaga ama iyadu waa inay yeelataa caymis.

Haddi aanad caymis u lahayn ardaygaaga, FWPS waxa ay ku siin kartaa macluumaadka ku saabsan sida aad caymiska uga heli karto shirkad caymis gaar ah: Myers | Stevens | Toohey & Co., Inc.

Doorshooyinka waxa kujira:

- Qorshaha Xanuunka iyo Shilalka Ardayga.
- Qorshayaasha Kubadda Cagta Wax ka Qabashada Dugsiyada.
- Qorshaha Wakhtiga Shilka Dugsiya.
- Labada galinba 24-saacadood Qorshaha Shilka.
- Qorshaha Shilka Ilkaha.

Diiwaan gelinta oonleena ah, fadlan raac lifaaqa hoose:

<https://myers-stevens.com/enrollment/>

Wac 800-827-4695  
(7:30 a.m. - 4 p.m. PST)

### Caruurta da'doodu tahay 3 iyo wax ka wayn:

253-945-2093: Child Find ee Federal Way School ee Degmada

Haddii qoyskaagu uu ku nool yahay xaalad ku meel gaadh ah, waxaad la xidhiidhi kartaa degmada aad joogto si aad uga qaybgasho baadhitaanka.

## SHURUUDAHA DIIWAAN GELINTA

Ilmo kasta waa inuu leeyahay diiwaanka talaaladiisa oo ku jira Xaalada Talaalka Shahaadada (CIS) ee caafimaad la xaqiijiyay leh ama uu haysto Shahaadada la Buuxshay ee Shardi Dhaafka oo ku jira galka cudur kasta oo talaalkiisu qasab yahay marka uu dugsiya galaayo. Talaalka wakhtigiisa la siiyay ayaa siinaaya carruurta difaaca ugu fiican. Cudurada faafa ayaa wali jira, safarada caalamka ayaana ku faafin kara cudurada lagu yaqaano qaybo kamid ah aduunka deegaanadeena. Haynta diiwaanka saxda ah oo la dhigo guriga ama dugsiya ayaa muhiim ah. Dhammaan carruurta kayar 19 sano ayaa talaalka ku heli kara si bilaash ah gobalkeena ayagoo ka helaaya rugaha caafimaadka ee qaybta ka ah Barnaamijka Talaalka Carruurta (VFC). Dhakhaatiirta ayaa qaadi kara lacagta bixinta talaalka, laakiin waa qasab inay qarashka dhaafaan haddii bukaanku ka codsado. Hel xarumaha VFC adoo adeegsanaaya qariiradaan talaalka <https://fortress.wa.gov/doh/vaccinemap>.

Shuruudaha dugsiya barbaarinta iyo carruurnimada:

<https://doh.wa.gov/community-and-environment/schools/immunization>

## TALAAL JABAN AMA BILAASH EE KIXIDA

Inkastoo xanuunka kiisaska Kixida (Pertussis) ee Gobolka Washington Hadda kuma jiraan heerarkii ugu sarreeyay ee la arkay sannadihii hore, Waaxda Gobolka ee Caafimaadka Dadweynaha waxay ku talinaysaa tallaalka dhammaan carruurta iyo dadka waaweyn. Waxay si gaar ah muhiim ugu tahay haweenka uurka leh saddexda bilood ee 3aad si ay u ilaaliyaan dhallaanka bilaha ugu horreeya noloshooda. Carruurta da'doodu tahay 18 jir waxay Washington ku helaan tallaalo kharash la'aan iyada oo loo sii marayo Barnaamijka Tallaalka Carruurnimada. Farmasiyo badan waxay bixiyaan talaal dheeriya Tdap oo dadka waawayn ee aan haysan caymis ama aan awoodin inay iska bixiyaan talaalka. Tallaalka qiimaha jaban waxaa ku jiri kara lacag maamul, laakiin haddii aadan awoodin kharashkan, waxaad codsan kartaa in lagaa dhaafo. Haddii aad hore macmiil uga ahayd rugta caafimaadka bulshada ama xarunta caafimaadka dadweynaha, waxa kale oo aad halkaas ka heli kartaa tallaalka kixida oo jaban ama bilaash ah oo carruurta iyo dadka waaweynba leh. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan kixida iyo halka laga helo tallaalka, booqo: <https://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/IllnessandDisease/WhoopingCough/WhoopingCoughFAQ>

## HARGAAB TALAAL

Xarumaha Xakamaynta Xanuunka (CDC) waxay leeyihiin qof kasta oo da'diisu tahay ugu yaraan 6 bilood waa inuu qaataa tallaalka hargabka sannadlaha ah, iyo in qaadashada tallaalka hargabka 2023-2024 ay aad uga muhiimsan tahay sidii hore. Lafagaraac ("duraygu") wuu ka halis badan yahay durayga caadiga ah ee caruurta. Sannad kasta, carruur badan ayaa la bukooda lafagaraac; qaar ka mid ah jirrooyinkaas waxay sababaan dhimasho. Sannad kasta celcelis ahaan 20,000 carruur ah oo da'doodu ka yar tahay 5 jir ayaa isbitaal la dhigaa dhibaatooyinka lafagaraaca awgii. Hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan:

- <https://kingcounty.gov/depts/health/communicable-diseases/immunization/clinics.aspx>
- <https://www.cdc.gov/flu/about/index.html>

## HIV IYO KULAMADA MACLUUMAADKA QOYSKA EE CAAFIMAADKA GALMADA

### SOO JEEDINTAN WAXAY KU EEGTAHAY WAALIDKA IYO MASUULIYIINTA OO KALIYA

Federal Way School ee Degmada wuxuu bixiyaa fursad uu kula wadaago qoysaska manhajka ka hortagga HIV/AIDS ee ardayda fasalada 5 ilaa 12. Manhajkan waxa uu diiradda saarayaa gudbinta iyo ka hortagga cudurka, isaga oo xoogga saaraya ka fogaanshaha. Xerka AIDS Omnibus Bill (2SSB 6221) Gobolka Washington kaasoo ansixiyay sanadkii 1998 wuxuu muujinayaa sidan soo socota:

## Fayraska Human Papilloma (HPV), Kansarka Makaanka, iyo Khayraadka Talaalka

Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington: <https://doh.wa.gov/you-and-your-family/illness-and-disease-z/meningitis-meningococcal-disease>

Xarumaha Xakamaynta iyo ka Hortaga Xanuunka: <https://www.cdc.gov/hpv/about/>

American Cancer Society: <https://www.cancer.org/cancer/risk-prevention/hpv/hpv-vaccine.html>

- Qeybta. 402 “Ardaydu waa inay helaan waxbarashada HIV/AIDS-ka ah ugu yaraan hal mar sannad dugsiyeedka oo bilaabmaya ugu dambayn fasalka shanaad.”
- Qeybta. 402 “Ardayga loogama baahna inuu ka qaybqaato waxbarashada ka hortagga HIV/AIDS haddii waalidka ama mas’uulka ardayga, ka qaybgalay mid ka mid ah, bandhigyada degmada, ay diidaan qoraal ahaan ka qaybgalka.”

Sanad dugsiyeedkan waxa jiri doona laba kulan macluumaad ku saabsan HIV iyo Kulamada Macluumaadka Qoyska ee Caafimaadka Galmada la bixinayo:

- Diseembar 4, 2024 laga bilaabo 5:30 - 6:30 p.m.
- Maarso 5, 2025 laga bilaabo 5:30 - 6:30 p.m.

Macluumaad dheeraad ah: <https://www.fwps.org/programs-and-services/health-services/hiv-aids-and-sexual-health-curriculum>.

## FAYRASKA HUMAN PAPILOMA (HPV)

*Ka qeyb ahaan Julaay 2005, dugsiyada Washington waa inay u diyaariyaan macluumaadka xanuunada Human Papillomavirus waalidiinta iyo masuuliyiinta dhamaan caruurta galaysa Fasalada 6-12. RCW 28A.210.080*

### Waa maxay fayraska Human Papilloma (HPV)?

HPV waa fayras caana oo ku faafa xidhiidhka galmada. Ilaa 75 boqolkiiba caabuqyada HPV waxay ku dhacaan dadka 15 ilaa 24 sano jir ka ah. HPV wuxuu sidoo kale sababaa kansarada ugu badan ee makaanka, kansarka dabada, iyo xubnaha taranka. Noocyada HPV ee sababi kara cudurada xubnaha taranku lama mid ah noocyada sababa kansarka. Noocyada HPV waxay sababi karaan kansarka xiniyaha iyo dabada.

### Waa maxay astaamaha HPV?

Inta badan dadka uu ku dhaco ma lahan wax calaamado lagu garto waxa ayna ku faafin karaan ayagoo ogeyn xitaa. Dadka qaar waxa ay ogyihiin in ay qabaan HPV sababtoo ah wax ay qabaan calaamadaha lagu garto sida finan kaga soo baxay xubinta taranka. Dumarka waxa ay ogaan karaan in ay HPV qabaan marka ay iska baraan kansarka ilmo galeenka (Pap tests) iyo baaritaanka HPV. Adeega caafimaad bixiyayaasha inta badan ma baraan HPV ilama uu arkaan unugyo aan caadi aheyn ee ilmo galeenka isbadal ee baaritaanka Pap.

### Sidee baa caabuqa HPV looga hortagi karaa?

Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo caabuqa HPV waa in aad ka fogaato dhamaan waxii galmo ah. Xitaa labo qof lamaane oo ebid ah ayaa qaadi kari HPV haddii mid kamida labadoodu uu horay galmooyin usoo sameyay. Isctimaalka kondhomka marka galmada la sameynayo ayaa ilaalo fiican kaa siinaya ka hortaga caabuqa HPV. Tallaaka HPV ayaa kusiinaya ilaalada ugu wanaagsan haddii aad qaadato inta aadan galmada bilaabin kahore - tallaalku kama saaro meesha HPV-ga hadda ku hayo. Tallaaka HPV waxa uu ka hortagi karaa caabuqyada qaar ee nuucyada halista ee HPV ee keena finanka, kansarka ilmo galeenka, guska iyo dabada.

### Yey tahay inuu qaato talaalka oo goorma ayuu helayaa?

- Labo irbadood oo talaalka HPV ayaa lagula taliyey caruurta (wiilasha iyo hablaha) da’aha 11-12; talaalka waxa la siin karaa bilowga da’da 9 sano jir.
- Labo xirmo oo tallaalka HPV ayaa lagula tallinaya dadka intooda badan oo bilaabaya qaadashada kahor inta aan la gaarin dhalashadooda 15aad.
  - » Xirmada labaad ee tallaalka HPV waa in lasiiyo 6 ilaa 12 bilood kadib xirmada kowaad.
  - » Dhalinyarada ee qaata labo xirmo oo kayar 5 bilood kala fog ayaa u baahan doona sadax xirmo ee tallaalka HPV.
- Sadax xirmo oo tallaalka HPV ayaa lagula taliya dhalinyarada iyo dhalinyarada yar-yar ee bilaabo qaadashada da’da 15 ilaa 26 sanno, iyo dadka difaaca jirkooda uu dhexgalay.
  - » Sadaxda xirmo ee lagu talliiyo ayaa loo kala qaadanaya 0, 1-2 bilood, iyo 6 bilood.
  - » Sadax xirmo ayaa loogu talliyaa dadka difaaca jirkoodu daciifay (waxaa ku jira dadka qaba cudurka HIV) jirana 9 ilaa 26 sanno.

## Khayraadka Qoorgooye

Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington:

<https://doh.wa.gov/you-and-your-family/illness-and-disease-z/meningitis-meningococcal-disease>

Xarumaha Xakamaynta iyo ka Hortaga Xanuunka:

[www.cdc.gov/meningococcal/about/index.html](http://www.cdc.gov/meningococcal/about/index.html)



## QOORGOOYE

Ka qeyb ahaan Julaay 2005, dugsiyada Washington waa inay u diyaariyaan macluumaadka xanuunada Meningococcal waalidiinta iyo masuuliyiinta dhamaan caruurta galaysa Fasalada 6-12. RCW 28A.210.080

### Xanuunada Meningococcal

Dadka qaba cudurka meningococcal ayaa u faafiya si toos ah marka ay qufacaan, shumiyaa, ama afka kula wadagaan wax kasta (dhallada biyaha, raashinka cuntada, roosetada, cadayga ilkaha). Calaamadaha iyo cadeymaha cudurka meningococcal inta badan ku bilawdo si dagdag ah iyo waxaana kamida qandho, madax xanuun, iyo qoorto adkaata. Waxa ayna ka bilaaban kartaa calaamadaha lamidka ee hergabka. Dadka qaba cudurka meningococcal ayaa inta badan qaba labo-labo, matag, iyo dareen badan oo dhanka iftiinka, cuncun, iyo jahwareer. Waxa ay keeni kartaa burkiito, infekshinka dhiiga, iyo Meningitis (barar ku yimaada daboolka maskaxda iyo laf-dhabarta). Cudurko daran waxa uu ku keeni kara dhaawac maskaxda, maqalka oo kaa luma ama xubno iyo xitaa dhimasho. Nasiib wanaag, infekshinkan nolasha halista ku ah waa mid dhif iyo naadir ah. Waxaan inta badan helnaa wargalin u dhaxeeyo 26 ilaa 76 sanad walbo gudaha Washington, waxaa ku jiro 1 ilaa 8 dhimasho ah. Dhalinyarada iyo dhalinta waaweyn ayee ugu badan tahay in uu ku dhaco cudurka Meningococcal, qaasatan haddii ay u nool yihiin sidii koox, sida jiifka kuleejyada.

### Talaalka Meningococcal Conjugate (MCV4)

MCV4 ayaa ka ilaalineysa ilamagaaha nuuca ugu badan ee bakteeriyada keenta cudurka Meningococcal. Washington waxa ay ku siineysa dhamaan tallaallada lagu taliye ee caruurta ilaa 18 sanno jir, oo laga heli karo adeeg bixiyayaasha xanaanada caafimaadka dhamaan gobolka. Adeeg bixiyayaasha ayaa laga yaaba in ay ka qadaan qidmada booqashada xafiiska iyo lacagta tallaal siinta. Dadka aan awoodin lacagta siinta ama durida waxa ay codsan karaan in laga dhaafo. Dhalinyarada caafimaadka qabta ayaa heli kara hal xirmo oo MCV4 da'da 11-12 sanno jir. Dhalinyarada aan helin xirmadooda ugu horeyo ee waqtiga waa in ay helaan hal xirmo sida ugu dhaqsiyahaa badan. Xirmada labaad (adkeydso) ayaa lagula talliya da'da 16 sanno ama waqti kasto oo ka horeya xilliga kuleejka. Waxaad la hadashaa adeeg bixiyaha xanaanada caafimaad ee tallaalka.

Baro wax badan oo ku saabsan cudurka Meningococcal iyo sida looga hortago goobaha ku taxan dhanka bidix.

## Hoolka Badbaadada Waxbarashada

Waxaa sameyay Waaxda Caafimaadka Washington oo la shaqeyneso Xafiiska Washington ee Maareyaha-Guud ee Hagaha Shacabka iyo hayadaha kale, Hoolka Badbaadada Waxbarashada waa goob lagu bilaabo in aad wax ka barato. Hoolka Badbaadada Waxbarashada waa maktabad warbixin iyo agabka arrimo badan oo badbaado iyo caafimaad ee iskuulka, ardayda iyo qoysaska/xanaaneyayaasha.

Mowducyada ugu muhiimsan ee badbaado ayaa sharaxaya Sharciga Washington ee [HB 1230](#) waxaa kamida: Istaraatiijiyada Kahortaga Iskabadinta Opioidka, Keydinta Amaanka iyo Qorida Dhaqtar iyo Dawooyinka Miiska Laga Iibsado, iyo Keydinta Amaanka ee Hubka iyo Rasaasta. DOH waxa ay cilmi baaris ku sameysay deegaanka, gobolka iyo federaalka iyo agabka bulshada si jawaabo loogu helo su'aallaha ugu badan ee arrimahan ku saaban.

Booqo bogga Internetka ee Waaxda Caafimaadka Hoolka Badbaadada Waxbarashada ee Washington: <https://doh.wa.gov/community-and-environment/schools/safety-study-hall>

DUGSIYADA  
AMMAANKA  
**LINKA TIBA**

Furaan  
**24/7**

 **MAQAL**  
ma jiira?

 **WAX**  
sheeg!

 **WAX**  
ma ogtahay

SOO wac mise TEXT  
**253-945-SAFE**

Iskul kada waye sii amaankada.



**FEDERAL WAY**  
PUBLIC SCHOOLS

Wixii macluumaad dheeriya ama su'aalo khuseeya ogeysiiska isticmaalka cayayaan dilayaasha, fadlan la xidhiidh:

**Brian Humphreys**

Maamulaha Dayactirka  
Adeegyada Taageerada  
Federal Way Public Schools  
1211 S. 332nd St.  
Federal Way, WA 98003  
[bhumphre@fwps.org](mailto:bhumphre@fwps.org)  
253-945-5939



## PESTICIDE USE

Sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay wargalinta iyo ogeysiiska dhamaan codsiyada cayayaan dilayaasha ee ka dhacaya xarunta dugsiga. Siyaasadaha soo socota ee Maamulka Cayayaanka (IPM) ayaa ah siyaasada isticmaalka cayayaan dilayaasha degmada ee sharciga. Warqada ogeysiiska dhameyskatiran ee sanadlaha, fadlan iimayl u dir ama wac Brian Humphreys.

Federal Way School ee Degmadu waxay raadinayaan inay ku xakameeyaan cayayaanka dhismayaasheena iyo garoonadeena qaabab, nidaamyoy, iyo qalab ka dhashay xakameynta cayayaanka iyadoo la ilaalinaayo heerarka sare ee caafimaadka iyo badqabka aqoonyahanada, shaqaalaha, iyo dadweynaha. Si aad noogu caawisid gaadhista hadafkani, waxaanu isticmaalnay Siyaasada Maamulka Cayayaanka (“IPM”) si aan wax uga qabo dhibaatooyinka dhamaan cayayaanka aynu kula kulano degmada dhexdeeda.

### Siyaasada Maamulka Cayayaanka

Maamulka Cayayaanku waa talaabo iyo go'aan gaadhis lawada dejiyey oo isticmaalaysa qaababka iyo siyaasadaha ugu haboon ee xakameynta cayayaana, hab deegaan ahaan iyo dhaqaale ahaanba haboon, si loo gaadho ujeedooyinka maamulka cayayaanka ee degamda.

Waa ujeedka Federal Way Public Schools in laga faa'idaysto shuruucda IPM si loo maamulo cayayaanka loogana hortago heerarka aan la aqbali karin ee dhaqdhaqaaqa cayayaanka iyo waxyeelada dhaqaale, iyadoo leh khatatr ugu yar ee dadka, hantida, iyo deegaanka kasoo gaadhi karta. Baddelka siyaabo kale (farsamo, jidheed, kiimo, dhaqan ama bayoolaji), oo aanay ku jirin talaabo, ayaa la tixgalin doonaa.

Qaababka maamulka cayayaanka ee bilaa kiimikada ah ayaa la hirgalin doonaa, markay macquul tahay, iyadoo la isticmaalaayo afarta heer ee nidaamka xakameynta. Nidaamyadan waxay hubinayaan in ka saarista iyo helida diidmada, waxka badelka hoyga iyo deegaanka, xakameynta farsamo iyo duleed iyo cayayaan dilayaasha xadidan dhamaan la tixgaliyo ka hor doorashada qaabka “ugu wanaagsan”. Marka la go'aamiyo in cayayaan dilaha la isticmaalo si loo gaadho hadafka maamulka, agabka ugu khatarta yar, isticmaalka, iyo habka isticmaalka ayaa la dooran doonaa.

Baadhisaha waxa lagu sameeyaa dhamaan dhibaatooyinka cayayaanka ee lasoo sheegay ka hor intaan siyaasad xakameyn la isticmaalin. Baadhitaanu waxay go'aamiyaan jiritaanka dhabta ah iyo aqoonsiga nooca cayayaanka, heerka khatarta caafimaad ama hantiyeed, dhanka dhibaataada, iyo xaaladaha keenaya fiditaan dheeriya.

**Xakameynta:** Ka dib baadhista, siyaasada xakameynta ayaa la siiyaa degmadu si ay u ansixiso. Ansixinta waxa looga baahan yahay xubin shaqaale oo loo igmaday ilaalinta (oo fahmaysa IPM sida sare lagu xusay). Siyaasadaha xakameynta uma baahan karaan talaabo dheeriya haddii dhibaataada cayayaanku aanay keenayn. Siyaasadaha xakameynta waxa ku jira talaabooyinkan soo socda:

**Heerka koobaad ee xakameynta:** Go'aaminta ama helida diidmada. (Ka hortago in cayayaanku galaan)

**Heerka labaad ee xakameynta:** Waxkabaddelka hoyga iyo deegaanka. (Ka xidhista cuntada cayayaanka, galinta xaalado adag)

**Heerka saddexaad ee xakameynta:** Xakameynta farsamo. (Isticmaalka dabinka, cayayaan eryayaasha iyo qalabka lagu xakameeyo faafida cayayaanka)

**Heerka afraad ee kontoroolka:** Isticmaalka dawooyinka cayayaanka ah ee la isticmaalo. Codsiyada gudaha lagu talinayaa waxay ku egyihiin in lagu xadido baaskiilada, pheromones, boodhka boric acid, ama cayayaanka la ansixiyay kaas oo yareeya qaadashada. Waa siyaasaddeena in mas'uuliyinta, shaqaalaha iskuulka, macallimiinta, waalidiinta ama mutadawiciinta kale aysan codsan, iibsan, ama aysan degmada soo gelin wax sun ah. Waaxda Dayactirka u sheeg dhamaan dhibaatooyinka cayayaanka iyada oo la marayo habka shaqada ama taleefan.

**Ilaalinta Diwaanka:** Diwaanada waxa laga ilaaliyaa dhamaan baadhisaha, hawlaha, bilaa hawlaha, iyo talaabooyinka xakameynta, oo ay ku jiraan isticmaalka cayayaan dilayaashu. Diwaanadan waxa ilaaliya dugsiga degmada waxaana lagu ilaaliyaa Xafiiska Waaxda Ilaalinta.



# ParentSquare

## Ku xirnoow Federal Way Public Schools (Dugsiyada Dadweynaha Federal Way) adoo adeegsanaaya ParentSquare

Parent Square waa aalad xiriir oo isku dhafan oo u sahlaysa qoysaska inay nagu xirnaadaan meel kasta oo ay joogaanba!

### Adoo adeegsanaaya Parent Square, qoysaska FWPS:

- Ayaa heli doona dhammaan xiriirada uga yimaada degmada, dugsiya, iyo fasalka iimeelka, fariin qoraal ama ab.
- Arki doona kalaandarka dugsiya iyo RSVP si aad u aragto munaasabadaha soo socda.
- Nidaamin kara dookhyadooda ogeysiiska.
- Ku helaaya fariimaha luuqadooda hooyo.
- Iyo adeegyo kale!



Inkastoo Parent Square laga geli karo aalad kasta, waxaan ku boorinaynaa qoysaska inay soo degsadaan abka si ay degdeg ugu helaan xiriirada dugsiya.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah Parent Square, fadlan la xiriir Waaxda Isgaarsiinta ee FWPS oo aad ka helayso 253-945-2264.

Xog badan ka ogoow [www.fwps.org/parentsquare](http://www.fwps.org/parentsquare)

ARDAY KASTA: COD. RIYO. MUSTAQBAL WANAAGSAN.



FEDERAL WAY  
PUBLIC SCHOOLS





## MICROSOFT OFFICE 365 IYO GOOGLE G SUITE EE WAXBARASHADA

Dhamaan aqoonyahanada Federal Way Public Schools ee fasalada K ilaa 12 waxay heli karaan adeeg iimayl bilaasha iyo goob wada shaqeyn waxbarasho loogu talagalay kaliya. Adeegyada iyo akoonada waxa bixisa degmada iyadoo isticmaalaysa Microsoft Office 365 iyo Google G Suite ee Waxbarashada, labaduba waxay ku saleysan yihiin nidaamka khadka ee meelkasta, wakhti kasta goobta waxbarashada iyo meelkaleba.

limaylka degmada ee ardeydu inay ka faa'idaystaan Aqoonsiga aqoonyahanka ee magaca isticmaalaha iyo furaha isku mid ka ah. Tusaale ahaan, aqoonyahan leh Aqoonsiga #12345 wuxuu noqon doonaa sidan soo socota:

- Office 365: [12345@fwps365.org](mailto:12345@fwps365.org)  
Wabsaayt: <https://login.microsoftonline.com/>
- Google G Suite ee Waxbarashada: [12345@p12fwps.org](mailto:12345@p12fwps.org)  
Wabsaayt: <https://www.google.com/a/p12fwps.org/>

Akoonadan waxa lasiiyaa ardeyda si loo siiyo xidhiidh joogto ah oo la isku haleyn karo oo macalimiintooda iyo shaqaalaha ah. Aqoonyahanadu waa inaanay la wadaagin furayaasha akoonadooda dadka kale.

Waxa intaasi dheer, shuraakadayada Microsoft waxay u saamaxaysaa aqoonyahanada K-12 inay ku rakibtaan Office 365 ilaa 15 aaladood, oo leh 5 liisan laabtoob koomiyutaris ah (MAC ama PC), 5 liisan oo tilifoonada casriga ah, iyo 5 liisan aaladaha taabledka (iOS iyo Android). Qeybahan goobtu way kala duwanaa karaan madasha iyo aaladaha. Apps ka waxa ku jira Microsoft Outlook, Word, PowerPoint, OneDrive, OneNote iyo Microsoft's Integrated Learning Tools. Aqoonyahanadu waxay ku heli karaan adeegyadan ciwaanka iimaylkooda iyo furaha degmada. Isticmaalka Office 365 wuxuu u saamaxayaa aqoonyahanadu inay isticmaalaan agabka waxbarashada ee hal-abuurka, wadashaqeynta iyo waxsoosaarka.

**Guji halkan** si aad waxbadan uga ogaatid sida loogu rakibo Microsoft Office koomiyuutarka.

Dhammaan ardayda ku jira fasallada K ilaa 12 waxay leeyihiin koontooyinka gaarka ah ee ardayda. Haddii aqoonyahankaagu aanu hubin furahiisa/heeda, adlan la xidhiidh dugsiiga wixii caawimo ah.

**Afeef:** Helida iyo isticmaalka Microsoft Office 365 iyo/ama G Suite akoonadu waa xuquuq. Isticmaalka akoonadan waxay ku xidhan yihiin xaaladah isku midka iyo xayiraadaha qabanay isticmaalka shabakada degmada.

Degmadu waxay xaq u leedahay inay ka noqoto isticmaalka akoonada haddii ay jirto sabab la aamisan yahay in akoonkaasi si qaldan loo isticmaalay ama in ardeygu jabiyey siyaasadaha degada ama tilmaamaha isticmaalka la aqbali karo. Jabinta siyaasada degmada ama tilmaamahan waxa ka dhalan karo talaabo anshax-marin, oo ay ku jirto hakinta ama ka eryida dugsiiga iyo hakinta ama kala noqoshada xuquuqda isticmaalka shabakada iyo koomiyuuturada.

Ardeyda isticmaalaysa Microsoft Office 365 iyo/ama G Suite ayaa ka masuul ah daabacaada iyo/ama "backing up" faylasha elektarooniga ee nidaamkooda. Degmadu kama masuul ah wixii xog lunta ee ay keento qalad isticmaal, qalad nidaamka ama dhibaato. Degmadu waxay xaq u leedahay inay hesho macluumaadkasta oo lagu kaydiyey Apps-ka ardeyga ee Google Apps ee Waxbarashada iyo/ama akoonka Microsoft Office 365 ujeedooyin baadhis, amni ama ilaalin awgood.